# Xuquuqdaada iyo ilaalinta Ka dhanka ah Biilalka Caafimaadka ee Lama Filaanka ah

**Markaad hesho daryeelka Degdega ah ama uu ku daaweeyo dhakhtar aan ku jirin caymiska oo jooga isbitaal caymiska ku jira ama xarunta qaliinka degdega ah, waxaa lagaa ilaalinaaya biilka lama filaanka ah ama biilka dheeriga ah.**

**Waa maxay "biilka dheeraadka ah" (oo mararka qaar loogu yeero biilka lama filaanka ah)?**
Markaad aragto dhakhtar ama adeeg bixiye kale oo caafimaad, waxa laga yaabaa in lagugu yeesho kharashyo aad jeebkaaga ka dhiibayso, sida qaybta caymiska, qasaaro qayb iyo/ama lacagaha caymisku goosto. Waxaa laga yaabaa inaad gasho qarashaad kale ama suuragal ah inaad dhiibto qarashka oo dhan haddii aad u tagto dhakhtar ama booqato xarun caafimaad oo aan ku jirin shabakada caymiskaaga caafimaadka.
Qarashka aad jeebka ka dhiibayso waxaa laga wadaa qarashka dhakhaatiirta iyo xarumaha "aan heshiis kula jirin" caymiskaaga caafimaadka. Dhakhaatiirta ka baxsan caymiska ayaa loo ogolaan doonaa inay kaa qaadaan baaqiga kasoo hara qaybta uu caymisku baxsho iyo cadadka buuxa ee adeegga. Tan waxaa loogu yeedha "biilka dheeraadka ah". lacagtani ayay u badan tahay inuu ka bato qarashaadka caymisku daboolaayo ee adeegga isku midka ah, waxaana laga yaaba inaan lagu xiaabin lacagta xadigga aad jeebkaaga ka dhiibayso sanadkii.
Biilka lama filaanka ah waa baaqiga "biilka aadan filanayn". Arintaan ayaa dhici karta marka aadan maamuli karin dadka qaybta ka ah daryeelkaaga–sida markaad gasho xaalad degdeg ah ama marka aad balan ka qabsato xarun shabakada katirsan laakiin uu si lama filaan ah lacag kuu saaro adeeg bixiye ka baxsan caymiska.

**Waa lagaa difaacayaa biilka dheeraadka ah ee kaaga baxaaya:**

**Adeegyada degdega ah**
Hadii aad gasho xaalad caafimaad oo degdeg ah aadna adeegyada xaalada degdega ah ka hesho dhakhtar ama xarun kabaxsan caymiska, cadadka ugu badan ee qarashka uu dhakhtarka ama xaruntu kugu sheegan karto waa cadadka wadaaga ah ee qarashka caymiskaaga (sida qaybta caymiska ama qarashka). Lagaama qaadi doono qarashka dheeraadka ah markaad hesho adeegyadaan xaalada degdega ah. Tan waxaa ku jira adeegyada aad heli kartid kadib markaad soo kabato, ilaa inaad bixiso maahee ogolaansho qoran aadna meesha ka saarto difaacyada ku aadan inaan lagaa qaadin qarashaadka dheeraadka ah ee adeegyadaan kadib markaad soo kabato.

**Adeegyada qaar oo lagu baxsho isbitaalka ama xarumta qaliinka gudmarka degdega ah ee caymiska ka tirsan**
Markaad adeegyo ka hesho isbitaal ama xarunta qaliinka degdega ah oo kamid ah caymiska, adeeg bixiyaasha qaar ayaa noqon kara kuwo aan caymiska ka tirsanayn. Markay xaaladahaan jiraan, cadadka ugu badan ee adeeg bixiyaashaas kaa qaadi karaan waa cadadka qiimaha wadaaga a ee adeeg bixiyaasha ka tirsan caymiska. Tani waxay qusaysaa caafimaadka degdega ah, suuxinta, hadalka, raajada, shaybaarka, daryeelka ilmaha dhasya, kaaliyaha dhakhtarka qaliinka, dhakhtarka isbitaalka, ama adeegyada booqashada daryeelka adag. Adeeg bixiyaashaan kaama qaadi karaan qarash dheeraad ah kaamana codsan karaan inaad ka tanaasusho difaacyadaada ka dhanka ah in baaqi dheeraad ah lagaa qaado.

Haddii aad hesho adeegyo kale oo lagu baxsho xarumahaan caymiska ka tirsan, adeeg bixiyaasha ka baxsan caymiska ayaan kaa qaadi karin qarash dheeri ah, ilaa inaad bixiso maahee ogolaansho qoraal ah aadna ka tanaasusho difaacyadaada.

**Adiga marna lagaama doonaayo inaad ka tanaasusho difaacyadaada ka dhanka ah qarashka dheeraadka ah. Lagaama doonaayo inaad daryeel ka qaadato adeeg bixiye ka baxsan caymiska. Waad dooran kartaa adeeg bixiye ama xarun ka tirsan shabakadaada caymiska.**

**Sharciga Gobalka Michigan ee Bukaannada Ku jira Caymisyada Caafimaadka ee Gobalku Aqoonsan yahay**
Sharciga Michigan ayaa difaacyo siinaaya bukaannada caymisyada caafimaadka ee gobalku aqoonsan yahay. Tusaale ahaan, bixiyaasha ka baxsan caymiska ee daryeelka siinaaya bukaannada aan ku jirin xaalada degdega ah waa inay xogaha qaar u sheegaan bukaannada sida kuwa soo socda:

- In aan caymiskaaga caafimaadka laga yaabo inuu daboolin dhammaan adeegyada dhakhtarka ka baxsan caymisku uu bixin doono;
- Qiyaasta qiimaha adeegyada oo daacad ah waa in la siiyaa;
- In aad xaq u leedahay inaad codsato inuu adeegga bixiyo dhakhtarka caymiska katirsan.

**Marka qaadista qarash dheeri ah aan la ogolayn, waxaad sidoo kale haysataa difaacyada soo socda:**

- Waxaad keliya masuul ka tahay inaad dhiibto qaybta kaagasoo aada qarashka (qaybta caymiska, qasaaro qaybta, iyo lacagaha caymisku jarto ee aad bixin lahayd haddii aad adeegga ka hesho dhakhtarka ama xarunta caymiska ka tirsan). Caymiskaaga caafimaadka ayaa bixin doona qarashaad adeeg bixiyaasha iyo xarumaha ka baxsan caymiska si toos ah.
- Caymiskaaga caafimaadku waa inuu si guud:
  - U daboolaa adeegyada Degdega ah ayadoon lagaa doonayn inaad bixiso ogolaanshaha adeegyada xili hore (ogolaanshaha hore).
  - Waa inuu daboolaa adeegyada degdega ah ee ay ku siiyaan dhakhaatiirta ka baxsan caymiska.
  - Waa inuu ku saleeyaa lacagta dhakhtarka ama xaruntu kugu yeelato (qarash wadaag) cadadka aad bixin lahayd markaad adeeg ka hesho dhakhtar ama xarun caymiska ku jirta uuna ku muujiyaa cadadka sharaxaadaada gunnooyinka.
  - Waa inuu ku xisaabshaa cadad kasta ood ku bixiso adeegyada degdega ah ama adeegyada ay bixiso cid ka baxsan caymiska lacagta uu caymisku kaa jarto iyo xadigga lacagta aad jeebka ka dhiibayso.

Haddii aad aaminsan tahay in si khaldan qarash dheeri ah lagaaga qaaday aadna caymis ka haysato caymiska caafimaadka oo gobalku sharciyeeyay, waxaad la xiriiri kartaa Michigan Department of Insurance and Financial Services (Waaxda Caymiska iyo Adeegyada Dhaqaalaha ee Michigan) **877.999.6442** ama booqo webseedka DIFS si aad u gudbiso cabasho. Haddii aad haysato caymis ganacsi aadna aaminsan tahay in qarash khaldan lagaa dalbaday, waxaad la xiriiri kartaa xafiiska caawimaada ee No Surprises oo aad ka helayso **800.985.3059**.

Booqo: **cms.gov/nosurprises/Ending-Surprise-Medical-Bills** si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan xuquuqdaada sharciga federaalka.

Booqo: **michigan.gov/difs** kadibna guji 'Surprise Medical Billing (Qarashka Dheeriga ah ee Lama Filaanka ah)' si aad u hesho xog dheeri ah oo ku saabsan xuquuqdaada sida ku cad sharciga Michigan.

Si aad u hesho liiska buuxa, fadlan ka codso buuga tilmaamaha dhakhtarkaaga ama booqo **corewellhealth.org/policies**

Corewell Health © 10.2023